Dheefaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo

Su’aal: Muxuu yahay barnaamijka, sidee ayaanse ugu qalmayaa?
Jawaab: Natiijada Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah (Collective Bargaining Agreement CBA) ee u dhaxeeya Gobolka Washington iyo Shaqaalaha Caalamiga ee Shaqaalaha (Service Employees International Union SEIU) 925, bixiyeyaasha xanaanada cunugga ee ruqsad haysta ayaa xaq u yeelan kara dheefaha daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha laga bilaabo Julaay 1, 2021.

Waa inaad buuxisaa dhamaan shuruudaha soo socda si aad ugu qalanto dheefaha:

- Waxaad tahay bixiye xanaanada cunugga ah oo ruqsad haysta oo ah Gobolka Washington.
- Waxaad siisaa daryeel ugu yaraan hal cunug afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah seddexdii bilood ee la soo dhaafay, kaasoo ka qeybgalkiisa daryeelka ay maalgeliso Working Connections ee Daryeelka Carruurta, Daryeelka Carruurta Xilliga ah, ama barnaamijka kabidda Daryeelka Ilmaha waxaana lacag lagu siiyaa Nidaamka Lacag bixinta Adeega Bulshada (Social Service Payment System SSPS)
- Ma lihid caymis caafimaad oo kale.
- Waxaad codsanaysaa caymis daryeel caafimaad.

Su’aal: Maxay yihiin xulashooyinka aan u leeyahay faa'iidooyinka caafimaadka iyo ilkaha?
Jawaab: Labadan qorshe caafimaad ee soo socda ayaa lagu heli karaa iyadoo lagu saleynayo lambarkaaga boostada: Kaiser Permanente ee Washington ama Aetna. Fadlan nala soo xiriir si aan uga hadalno isbeddelada ku saleysan xaaladdaada gaarka ah.

Labadan qorshe ilko ee soo socda ayaa lagu heli karaa iyada oo ku saleysan lambarkaaga boostada: Delta Dental ee Washington ama Willamette Dental. Haddii aadan dooran qorshe ilko waqtiga isqorista, si otomaatig ah ayaa lagugu qoraa Delta Dental.

Su’aal: Waa imisa kharashka caafimaadka iyo ilkaha?
Jawaab: Qiimaha waa $30 waana lagaa jari doonaa lacagtaada kabistaada bil kasta.

Su’aal: Sideen isku qoraa?
Jawaab: Daabac oo buuxi **foomka diiwaangelinta**. Dhamaystir, saxiix, oo ku gudbi foomkaaga diiwaangelinta dhanka onlaynka halkan **https://www.dcyf.wa.gov/services/ssps/childcarehealthbenefits,** iskaan garee oo iimeel ugu dir foomka la buuxiyay **dcyf.healthcare@dcyf.wa.gov** , ama boosto ugu dir foomka la buuxiyay Department of Children, Youth, and Families, Child Care Health Benefits Program, PO Box

40970, Olympia, WA 98504-0970. *Fadlan la soco in DCYF aysan masuul ka noqon karin waqtiga adeegga Boostada Mareykanka.* Foomamka sidoo kale waxaa la codsan karaa iyadoo la wacayo 1-866-201-8343.

Su'aal: Goorma ayaan isqori karaa ama dalban karaa dheefaha? Ma jiraa xilli diiwaangelin gaar ah ama isqoris furan?
A: Waxaad soo gudbin kartaa foomkaaga diiwaangalinta ka dib markaad sheegato qaansheegtaada adeega ee SSPS ee daryeelka caruurta cunuga ruqsada haysta oo la siiyay ugu yaraan hal canug oo hela dheef afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah seddexdii bilood ee la soo dhaafay. Ma jiro xilli gaar ah ama furan oo isqoritaan ah. Isqoristu waxay ku saleysan tahay shuruudaha u qalmitaanka.

Su'aal: Goorma ayaan bilaabi karaa isticmaalka dheefahayga?
Jawaab: Waxaad bilaabi kartaa adeegsiga dheefahaaga bisha aad isdiiwaangaliso. Fadlan la xiriir bixiyaha caymiska si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan qorshahaaga.

Su'aal: Sideen u ilaaliyaa dheefahayga?
Jawaab: Waa inaad daryeeshaa ugu yaraan hal cunug oo qaata lacag kaabis ah afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah seddexdii bilood ee la soo dhaafay, oo aad u gudbiso sheegashooyin waqti ku eeg SSPS si ay u ilaaliso caymiska, mana aha inaad haysato daboolis kale oo caymis ah.

Su'aal: Qoyskayga (caruurta, xaaska) sidoo kale ma la daboolayaa?
Jawaab: Maya. Caymiska qoyska lama heli karo.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii aan ka maqnaado bil shaqo ah ama aan joojiyo daryeelka ugu yaraan hal cunug oo hela kaalmada?
Jawaab: Inaadan soo gudbinin codsi hal bil oo dhan waxay kaa dhigi doontaa inaad waayi doonto dheefahaaga daryeelka caafimaad. Maqnaanshaha codsiyada SSPS afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah seddexdii bilood ee la soo dhaafay waxay kaa dhaafi doontaa u qalmitaankaaga caymiska. Waxaad u baahan doontaa inaad dib isu qorto markaad buuxiso shuruudaha u-qalmitaanka markale.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii aan dalbado qaansheegta goor dambe?
Jawaab: Sheego sida ugu dhaqsaha badan. Qaan sheegashooyinka waa in la dalbadaa 15-ka bil kasta si loogu ogolaado in lagaa jaro lacagta caymiskaaga.

Su'aal: Miyaan ka bixi karaa ama ka tanaasuli karaa kaalmooyinkayga ka dib markii aan horeba u helay?
Jawaab: Haa, waad ka bixi kartaa ama waad iska dhaafi kartaa caymiska wakhti kasta. Waxaad u baahan tahay inaad nala soo xiriirto 20-ka bisha haddii aad rabto inaad ka baxdo bisha xigta. Tusaale ahaan: Haddii codsi isbeddel ah la helo Abriil 22, isbeddelku ma dhaqan galayo illaa Juun 1.

Su’aal: Ka waran haddii aan u qalmo caymis kale? Labadaba ma heli karaa?
Jawaab: Sida ku cad foomkaaga diiwaangelinta, waa inaad noo soo sheegtaa inaad heleyso caymis caafimaad oo kale oo aadan mar dambe u qalmin Gargaarka Caafimaadka Carruurta (Child Care Health Benefit).

Su’aal: Waa maxay isbeddelada la iga doonayo inaan soo sheego?
Jawaab: Waxaa lagaa rabaa inaad soo dirto iimeel ama soo wac si aad noogu soo sheegto isbeddelada sida ugu dhakhsaha badan. Waxaad u baahan tahay inaad soo sheegto haddii aad:

- Guurayso.
- Badal lambarka taleefankaaga koowaad ama cinwaanka iimaylkaaga.
- Aadan siinayn adeegyo ugu yaraan hal qoys oo qaata kaalmada.
- Dooro inaad ka dhaafto caymiska.

Su’aal: Ma laygu cashuurayaa dheefaha daryeelka caafimaadkayga?
Jawaab: Dheefahaaga daryeelka caafimaadka waxaa loo arkaa nooc ka mid ah dakhliga waxaadna u baahan doontaa inaad ku sheegto sannad walba canshuurtaada. Dukumiinti canshuur ah 1099 ayaa laguu soo diri doonaa dhamaadka Janaayo sanad walba. Macluumaadkan sidoo kale waxaa laga heli doonaa Bogga Bixiyaha ee SSPS. Haddii aadan horey uga diiwaangashanayn Barta Bixiyaha SSPS, fadlan kala xiriir SSPS cinwaankan **dshs_sspsmail@dshs.wa.gov**.

Su’aal: Maxay yihiin faa'iidooyinka gaarka u ah qorshahayga caafimaad?
Jawaab: Fadlan la xiriir bixiyaha caymiskaaga:

- Kaiser Permanente ee Washington: 1-888-901-4636 (TTY: 711) ama booqo **www.kp.org/wa**
- Aetna: 1-800-370-4526

Waxaad kale oo booqan kartaa **https://www.myseiubenefits.org/sbc/**. Marka loo eego SEIU 925, ka dooro KPWA ama Aetna macluumaadka ugu dambeeyay ee la cusboonaysiiyay. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Adeegga Miiska hore ee Dheefaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta (Child Care Health Benefits Service Desk), anaguna waxaan kaa caawin doonnaa inaad hesho qorshahaaga.

Su’aal: Goorma ayaan isbeddel ku samayn karaa dheefahayga?
Jawaab: Isbeddelada waxaa la samayn karaa marka laga baxayo ama lasoo galayo halka dheefaha daryeelka caafimaad la daboolo, mar dambe uma qalantid dheefaha, waxaad u qalantaa dheefaha, ama aad ka baxday adoo la xiriiraya Xarunta Adeegga Dheefaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta.

Su’aal: Maxaan samayn karaa haddii aan u guuro meel aan ku hoos jirin dheefaha aan hadda haysto?
Jawaab: Daboolka caymiskaaga wuxuu ku saleysan yahay lambarkaaga boostada, oo waxaad xaq u lahaan doontaa inaad hesho caymiska laga heli karo aagaaga. Fadlan la xiriir Xarunta Adeegga Dheefaha Caafimaadka Daryeelka Carruurta si aad ugala hadasho isbeddelada ku saleysan xaaladdaada gaarka ah.